

Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake

Foomka S – 4 (Fiiri Siyaasadda iyo Hababka Maamulka)

Mowduuca: Imaashada Ardayga iyo Ka-Dhaafidda Dugsiga

Qodobka: S = Siyaasadaha Ardayga

Ogeysiinta Waalidka xagga Waxbarashada Qasabka ah

Bacdama Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake ballan ku qaaday waxbarashada tayada leh, waxaan ka walwanaa marka cunug ka baaqdo dugsiga, sabab kasta ha noqoto. Nidaamka waxbarashada wuxuu u baahan yahay barashada isdabajoogta, ka-qeybgalka fasalka, waayaha barashada, iyo qaadashada daruusta. In ardayda ka maqnadaan waayaha fasalka maalin kasta waxay carqalad ku tahay nidaamka waxbarashada iyo tababarka.

Sharciyada Imaashada Qasabka ee Utah (Xeerka Utah) [Utah Compulsory Attendance Laws (Utah Code)] 53A-11-101-105 waxay rabaan in cunug *kasta oo gaaray da'da dugsiga* (da'da 6-18) lagu qoro dugsi iyo in uu si joogto ah u taggo dugsiga. Waalidiinta iyo ardayda waxay mas'uul ka yahiin imaashada joogtada ah. Waxaa dhici karto in ardayda laga dhaafo imaashada dugsiga haddii ay jiraan asbaab xaq ah oo jira: cudur, ballan caafimaad, degdegga qoyska, dhimashada xubin ka tirsan qoyska ama saxiib dhaw, xuska xafladaha diinta, iyo hawlaha qoyska ama safar (ee horay lagala hadlay maamulaha lagana soo qaatay ogolaasho).

Maalin kasta uu cunugaada ka maqan yahay dugsiga waxaa lagaa rabaa in aad dugsiga u qortid warqad gaaban taasoo sharaxaysa maqnaashada cunugaada.

Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake:

1. Kaddib marka cunugaada maqnaado sideed (8) maalin ama ka badan oo la FASAXAY (ama la'eg xissadaha fasalka) muddo hal sanno gudaheeda, waxaa dhici karto in maamulaha dalbado in warqad gaaban laga keeno taqtarka si loo fasaxo maqnaashada ku xigta.
2. Kaddib marka cunugaada maqnaado shan (5) maalin ama ka badan oo aan la FASAXIN (ama la'eg xissadaha fasalka) muddo hal sanno dugsiyeed gudaheeda, waxaa la soo saari doonaa Ogeysiiska Goysmada Kowaad iyo Ashatako (First Truancy Notification and Citation) taasoo codsanaysa in waalidka kaalmo ka geysto imaashada ardayga.
3. Kaddib marka cunugaada maqnaado toban (10) maalin ama ka badan oo aan la FASAXIN (ama la'eg xissadaha fasalkah) muddo hal sanno dugsiyeed gudaheeda, waxaa la soo saari doonaa Ogeysiiska Goysmada Labaad iyo Dacwadda (Second Truancy Notification and Citation). Waalidiinta waa in ay la shiraan madaxda dugsiga si ay isugu dayaan xallinta arrimaha imaashada ardayga.
4. Ardayga waxaa loo haystaa in uu "caadeystay goysmada" marka isaga/iyada la siiyo labo ama ka badan dacwadda goysmada muddo hal sanno dugsiyeed gudaheeda.
5. Kaddib marka ardaygaada maqnaado toban iyo shan (15) maalin ama ka badan oo aan la FASAXIN (ama la'eg xissadaha fasalka) muddo hal sanno duksiyeed gudaheeda, waxaa la soo saari doonaa Ogeysiiska Goysmada Saddaxaad iyo Dacwadda (Third Truancy Notification and Citation) iyo Ogeysiiska Dhageysiga Ka Horeeyo Maxkamadda (Notice of Pre-Court Hearing) taasoo u baahan in la yimaado Dhageysiga Ka Horeeyo Maxkamadda (Pre-Court Hearing). Waxaa dhici karto in waalidiinta ama Ilaaliyeyaasha haaya arday da'diisu ka yar tahay 12 ee haaysta macluumaadka dugsiga, in lala xariiriyo Xeer Ilaaliyaha Degmada Gobolka Salt Lake. Waxaa dhici karto in ardayda ka weyn 12 sanno, kana mid ah macluumaadka dugsiga, lala xariiriyo Maxkamadda Dhallin Yarada ee Degmada Saddaxaad (Third District Juvenile Court).

Si racfaan looga qaato Dacwadda Goysmada (Truancy Citation), qoraal ahaan u soo gudbi racfaanka una soo gudbi Gudiga Adeegyada Ardayga [Student Services Committee (SSC)] ee ku sugan dugsiiga ardaygaada ku qoran yahay. Racfaanada waa in loo soo gudbiyo SSC muddo 15 maalin laga bilaabo

taariikhda la soo saaray dacwadda. Tixraac Siyaasadda S-4 (Policy S-4) iyo S-4 Hababka Maamulka (Administrative Procedures).

Haddii aad su'aal ka qabtid imaashada cunugaada, kana mid ah maqnaashada la fasaxay iyo tan aan la fasaxin, fadlan la xariir dugsiga uu cunugaad ku qoran yahay. Waxaa la soo dhaweyntaa taageeradaada iyo wada shaqeyntaada.

La bedellay: 2/1/10

Dugsiga Demada Magaalada Salt Lake ma sameeyso takoor ku saleysan da', midab, itaal darri, asal qaran, uur, isir, diin, ama jinsi xagga barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Qofka soo socdo ayaa loo xil saaray in uu gacanta ku qabto su'aalaha ku saabsan siyaasadda ka madax banaan takoorka: Kathleen Christy, Kaaliyaha Agaasimaha, 440 East 100 South, Salt Lake City, Utah 84111, (801)578-8251. Waxaad kaloo la xariiri kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights Office), Denver, CO, (303)844-5695.

Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake

Foomka S – 4 [Fiiri Siyaasadda iyo Hababka Maamulka (Policy and Administrative Procedures)]

Mowduuca: Imaashada Ardayga iyo Ka-Dhaafidda Dugsiga

Qodobka: S = Siyaasadaha Ardayga

Ogeeysiiska Goysmada Kowaad iyo Dacwadda

Warqadda Dugsiga

Taariikhda:

Ku socoto waalidka ama ilaaliyaha:

Marka ardaygaada lagu soo qoray Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake, waxaa lagu siiyay macluumaad sharaxda sharuudaha imaashada dugsiga waxbarashada qasabka ah ee Utah.

Diiwaan gelinta kaddib, ardaygaada wuxuu dugsiga ka maqnaaday shan (5) maalin ama ka badan. In ardayda ka maqnadaaan waayaha fasalka maalin kasta waxay carqalad ku tahay nidaamka waxbarashada iyo tababarka.

Imaashada dugsiga joogtada ah waxaa amray sharciga gobolka. Fadlan hubso in cunugaada taggo dugsiga maalin kasta iyo in uu ku yimaado waqtiga. Haddii ay dhacdo in dhibaataada imaashada dugsiga cunugaada lagu xallin waayo dadaalkena, degmada waxaa laga rabaa in ay qaado tallaabo dheeraad ah.

Haddii aad aaminsan tahay in ogeeysiiskan kugu soo gaaray khalad ama haddii aad qabtid su'aal, fadlan la xariir xafiiska dugsiga.

Maamulaha Dugsiga:

Saxiixa

Ardaygaada waxaa lagu soo eedayay jebinta Xeerka Utah (Utah Code) §53A-11-101 ilaa 105, Sharuudaha Waxbarashada Qasabka ah (Compulsory Education Requirements) iyo Sharciga Maamulka (Administrative Rule) USOE R277-607. Ujeedada warqadaan waa ogeeysiis ahaan in Gafka Goysmada (Truancy Citation) la gaarsiiyay dhallin yarka iyo/ama waalidka/ilaaliyaha sida waafaqsan sharciga u dagan gobolka.

La Bedellay, 2/1/2010

Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake
Foomka S – 4 [Fiiri Siyaasadda iyo Hababka Maamulka (Policy and Administrative
Procedures)]

Mowduuca: Imaashada Ardayga iyo Ka-Dhaafidda Dugsiga

Qodobka: S = Siyaasadaha Ardayga

Ogeeysiiska Goysmada Labaad iyo Dacwadda

Horgalaha Warqadda Dugsiga

Taariikhda:

Ku socota waalidka ama ilaaliyaha:

Marka ardaygaada lagu qoray Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake, waxaa lagu siiyay macluumaad sharaxda sharuudaha imaashada dugsiga waxbarashada qasabka ah ee Utah.

Maqnaashada aan la fasaxin ee la'eg shan ama ka badan awgeed horaanta sannadka, ardaygaada waxaa la siiyay Dacwadda Goysmada Kowaad iyo Ogeeysiis.

Diiwaan gelinta kaddib, ardaygaada wuxuu dugsiga ka qaatay toban (10) ama ka badan maqnaasho. In dugsiga loo yimaado si joogto ah waxaa amray sharciga gobolka. Haddii ay dhacdo in dhibaataada imaashada dugsiga cunugaada la xallin waayo, degmada waxaa laga raba in ay qaado tallaabo dheeraad ah. Haddii ardaygaada caadeysto in uu gooyo, waxaa dhici karto in degmada kiiska ku wareejiyo xeer ilaaliyaha degmada ama maxkamadda dhallinta.

Fadlan soo wac dugsiga kana sameeyso ballan si aad uga hadashid maqnaashada ardaygaada si aan wadajir ahaan uga shaqeeyno dhibatadaan.

Haddii aad aaminsan tahay in ogeeysiisnaan kugu soo gaaray khalad ama haddii aad qabtid su'aal, fadlan la xariir xafiiska dugsiga.

Maamulaha Dugsiga:

Saxiixa

Ardaygaada waxaa lagu soo eedayay jebinta Xeerka Utah (Utah Code) §53A-11-101 ilaa 105, Sharuudaha Waxbarashada Qasabka ah (Compulsory Education Requirements) iyo Sharciga Maamulka (Administrative Rule) USOE R277-607. Ujeedada warqadaan waa ogeeysiis ahaan in dhallin yarka iyo/ama waalidka/ilaaliyaha la gaarsiiyay Dacwadda Goysmada (Truancy Citation) sida waafaqsan sharciga u dagsan gobolka.

La Bedellay, 2/1/2010

Dugsiga Degmada Magaalada Salt Lake
Foomka S – 4 [Fiiri Siyaasadda iyo Hababka Maamulka (Policy and Administrative Procedures)]

Mowduuca: Imaashada Ardayga iyo Ka-Dhaafidda Dugsiga

Qodobka: S = Siyaasadaha Ardayga

Ogeeysiiska Goysmada Saddaxaad iyo Dacwadda

Horgalaha Warqadda Dugsiga

Taariikhda:

Ku socota waalidka ama ilaaliyaha:

Bacdama ardaygaada ka maqnaadaay dugsiga toban iyo shan (15) maalin ama ka badan oo aan la fasaxin, waxaa adiga lagaa rabaa in aad timaadid Dhageysiga Ka Horeeyo Maxkamadda.

Taarii khda: _____

Waqtig a: _____

Meesha: Salt Lake City School District Office
440 East, 100 South, Salt Lake City, Utah

Waqtigaan, waxaad keeni kartaa waraaq ku saabsan maqnaashada ardaygaada. Waxaad fursad u lahaan doontaa in aad nala shaqeytid si loo xalliyo dhibaataada. Haddii aad ku dhacdid in aad timaadid dhageysigaan, taas waxay keeni kartaa in lagu wareejiyo xeer ilaaliyaha degmada maxkamadda dhallinta. Diidmada in laga jawaabo ogeeysiiskaan waa dembi hoose Heerka B (Class B misdemeanor).

Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan la xariir _____ ee ku sugan dugsiga ardaygaada.

Maamulaha Dugsiga

Saxiixa

Ardaygaada waxaa lagu soo eedayay jebinta Xeerka Utah (Utah Code) §53A-11-101 ilaa 105, Sharuudaha Waxbarashada Qasabka ah (Compulsory Education Requirements) iyo Sharciga Maamulka (Administrative Rule) USOE R277-607. Ujeedada warqadaan waa ogeeysiis ahaan in dhallin yarka iyo/ama waalidka/ilaaliyaha la gaarsiiyay Dacwadda Goysmada (Truancy Citation) sida waafaqsan sharciga u dagsan gobolka.

La Bedellay, 2/1/2010

Dugsiga Demada Magaalada Salt Lake ma sameeyso takoor ku saleysan da', midab, itaal darri, asal qaran, uur, isir, diin, ama jinsi xagga barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Qofka soo socdo ayaa loo xil saaray in uu gacanta ku qabto su'aalaha ku saabsan siyaasadda ka madax banaan takoorka: Kathleen Christy, Kaaliyaha Agaasimaha, 440 East 100 South, Salt Lake City, Utah 84111, (801)578-8251. Waxaad kaloo la xariiri kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights Office), Denver, CO, (303)844-5695.